

1

Akhri buug-yarahaaga codbixiyeyaasha si aad u barrato waxa ku qoran warqaddaada codbixinta.



2

Warqaddaada codbixinta, buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhyadaada.




3

Saxiix xagga dambe ee bakhshadda soo celinta ee warqaddaada codbixinta.



4

Soo celi warqaddaada codbixinta. Haddii ay tahay sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti hore codee!



5

Raad-raac warqaddaada codbixinta. Booqo kce.wiki/TrackMyBallot-SO ama isku qor helitaanka digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/BallotAlert. Kuwani waa hababka ugu wanaagsan ee lagu ogaado in warqaddaada codbixinta la tiriyay oo codkaaga la maqlay.



Sida loo

codeeyo!


Doorashada Gaarka ah ee Febraayo 2026

Degmada King Buug-yaraha Rasmiga ah ee Codbixiyeyaasha Deegaanka

sida ay codsatay Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412

Isku qor si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor barta kce.wiki/TrackMyBallot-SO.



Is diiwaan geli si aad u codeyso



Oonleenka: Booqo VoteWA.gov si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Gaarka ah ee Febraayo waa Febraayo 2.



Boostada: Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta kce.wiki/VoterReg oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Waa in la helaa ugu dambeyn Febraayo 2.



Shakhsi ahaan: Waxaad shakhsi ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Febraayo 10, Maalinta Doorashada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa barta kingcounty.gov/elections.

Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo qaab kale ah.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish, or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.


Nala soo xiriir si aad u hesho agabyadaada codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.



Baro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, Xarumaha Codbixinta, iyo in ka badan!



Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (OBMP) waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan. Waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, gaar ahaan kuwa indhooleyaasha ah ama uu aragoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si gaar ah u calaamadayaan.



Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag barta kingcounty.gov/elections/obmp.
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oonleenka oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay.

AMA

- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.

- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah aad u calaamadaysay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama adoo soo marsiinaaya boostada.

Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacaysno warqaddaada codbixinta.



Haddii aad u baahan tahay caawinnaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan kala soo xiriir xafiiskeena taleefanka 206-296-VOTE (8683).




Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku-deeqeyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo dowladda hoose:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha

www.pdc.wa.gov | Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828



Waxaan halkaan u joogaa in aan ku caawinno!

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawinno kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma doonaysaa inaad si gaar ah u calaamadaysno warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta kingcounty.gov/elections/obmp si aad uga faa'iidayso Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

Warqaddaada codbixinta ayaa waxaa ku duuban macluumaad waxtar leh! Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka dhex eegto:

- shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow,
- halka aad ka heli karto caawinnaad shakhsi ahaanneed,
- sida loo daabacdo warqaddaada codbixinta haddii taada kaa lunto ama waxyeello soo gaarto,
- sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta,
- iyo in ka badan!

206-296-VOTE (8683)
elections@kingcounty.gov
kingcounty.gov/elections

Baraheena Bulshada
[@kcelections](https://www.kingcounty.gov/elections)



Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama

oonleenka barta kingcounty.gov/elections.

Soo Jeedinta Lr. 1

Beddelaadda Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-15, ee khuseeya soo jeedin lagu maalgelinayo kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay buuxiso baahiyaha waxbarashada ee ardaydeeda iyadoo soo rogaysa canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, oo beddelaysa canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si loo taageero kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada Degmada ee uusan Gobolka Washington maalgelin:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|-------------------|---|---------------------|
| 2027 | \$1.67 | \$39,000,000 |
| 2028 | \$1.69 | \$41,500,000 |
| 2029 | \$1.71 | \$44,000,000 |
| 2030 | \$1.72 | \$46,500,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-15. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))

Bayaanka lagu taageerayo

Sarah Press, Malorie Larson

https://voteyesshoreline.wixsite.com/vote-yes-for-shore-1

Codbixiyeyaasha Shoreline iyo Lake Forest Park waxay si joogto ah u taageereen waxbarashada Dadweynaha. Canshuurta beddelka waxay sii wadaysaa dhaqankaas iyadoo la ilaalinayo barnaamijyo muhiim ah oo loogu talagalay 9,000+ arday. Haddii canshuuraha la ansixiyo, celceliska heerka canshuurta in ka badan afar sannad muddada canshuurta, 2027-2030, waxaa la saadaalinayaa inuu noqon doono mid ka hooseeya afartii sanno ee hore. Canshuurtaan waxay bixisaa 16.5% dakhliga hawlgalka degmada waxayna ka hortagtaa jarjaritaanka waaweyn oo haddii kale dhici lahayd.

Canshuurtaan waxay maalgelisaa waxa uusan gobolku maalgelin: tiro fasalka oo macquul ah, horumarinta xirfadeed ee macallimiinta, taageero waxbarasho oo dhammaystiran oo loogu talagalay dhammaan ardayda, barnaamijyo ardayda luqadaha badan barta, la-taliyeyaasha iskuulka iyo shaqaalaha taageerada, gaadiidka, ciyaaraha, fanka bandhigga, iyo kuwo kale hawlaha dheeraadka ah ee waxbarashada.

Mulkiileyaasha guryaha waxay bixin doonaan lacag ka yar oo loogu talagalay dugsiyada Shoreline sannadka 2027 marka loo eego 2025, xitaa haddii Canshuuraha Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada (EP&O) iyo Teknolojiyada labadaba la ansixiyo. Heerka ayaa hoos uga dhacaya \$3.21 qiimaha la qiimeeyay ee halkii \$1,000 kasta ee 2025 ilaa iyo \$3.20 sannadka 2027.

Shoreline waxay ka sareysa celceliska gobolka heerka qalin-jebinta iyo u diyaar garoowga jaamacadda iyadoo adeegaysa baahiyaha kala duwan ee ardayda. Ku Codee haa si looga hortago dhimmista shaqaalaha, loo ilaaliyo tiro fasalka oo yar, oo loo hubi in carruur kasta helo waxbarasho tayo leh iyada oo aan loo eegin asalka. Dugsiyada sida fiican loo maalgeliyay waxay xoojiyaan bulshadeenna waxayna ilaaliyaan qiimaha hantida.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Sicir-bararka iyo maalgelin muddo dheer ah oo aan ku filnayn waxay ka tageen adeegyada sharcigu farayo—sida waxbarashada gaarka ah, adeegyada aasaasiga ah, iyo caymiska—iyagoo leh khasaare sannadle ah oo sii kordhaaya oo gaaraya 25%. Ka dib sannado badan oo shaqaalaha la dhimmayay, wax kale oo la yareeyo ma harin. Maadaama maalgelinta gobolka iyo federaalku taagan tahay, ansixinta canshuurta dheeraadka ah waa habka keliya ee looga hortagi karo fasallo sii waaweynaada iyo adeegyo luma. Kordhinta 30–35% waxay keliya daboolaysaa khasaaraha jira iyo tirada shaqaalaha oo aan ku filnayn; waa lama huraan in laga gudbo heerka ugu hooseeya si ardaydu u kobcaan.

Doorashooyinka Degmada King looma oggola inay wax ka beddelaan bayaannada, mana qaadaan mas'uuliyadda qoraallada ku jira.

Bayaanka Sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1 waxay Dugsiyada Dadweynaha ee Shoreline u oggolaan doontaa inay beddelaan canshuurta barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee hadda jirta taasoo wakhtigeedu dhammaanayso dhammaadka sannadka kalandarka ee 2026. Canshuuraha laga soo ururiyo canshuurtaan beddelka ah waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee aan si buuxda looga maalgelin Gobolka Washington. Tan waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, shaqaale si loogu joogteeyo tirada fasallada macquul ah, horumarinta xirfadeed ee macallimiinta, taageerooyinka waxbarashada oo loo dhan yahay, barnaamijyada bartayaasha luqadaha badan, shaqaalaha taageerada ardayda ee dugsiga ku salaysan, gaadiidka, kooxaha ciyaaraha iyo waxqabadka, farshaxanka bandhigga, iyo hawlaha kale ee ka baxsan manhajka. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa webseedka Degmada barta www.ssd412.org/Levies26.

Canshuurta beddelaadda ee afarta sanno ah ee lasoo jeediyay ee barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada waxay oggolaan doontaa ururinta canshuuraha si loo bixiyo ilaa iyo \$39,000,000 sannadka 2027, \$41,500,000 sannadka 2028, \$44,000,000 sannadka 2029, iyo \$46,500,000 sannadka 2030. Heerka canshuurta ee halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay inuu soo saaro caddadyadaan canshuurta ayaa lagu qiyaasay inay tahay \$1.67 sannadka 2027, \$1.69 sannadka 2028, \$1.71 sannadka 2029, iyo \$1.72 sannadka 2030. Heerka canshuurta ee saxda ah iyo caddadka la ururinayo ayaa laga yaabaa in la hagaajiyo iyadoo lagu salaynayo qiimaha dhabta ah ee qiimeynta la qiimeeyay ee hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada iyo xaddidaadyada uu soo rogay sharciga Gobolka wakhtiga la soo rogayo canshuurta. Ka dhaafitaannada canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Wixii macluumaad oo dheeraad ah, wac Waaxda Qiimeynta Degmada King, 206-296-3920.

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))

Bayaanka looga soo horjeedo

Degmada Dugsiga Shoreline waxay kaa codsanaysaa inaad taageerto canshuur 57% ka weyn midda aan miisaaniyadaynayn afar sanno ka hor.

Taasi waa sax, *kordhin 57% ah...* dhammaantoodna waxay ka dhalatay in mas'uuliyiinta la doortay aysan si habboon u xakamayn kharashaadka. Halkii ay iyagu qaban lahaayeen shaqada adag, waxay qoysaskeena ka codsanayaan inay bixiyaan qarashka. Soo jeedinta 1 waxay qoyska celcelis ahaan ku kacaysaa *\$6,600 afarta sanno ee soo socda*, taasoo aad u xanuujinaysa qoysaska dakhligooda hooseeya iyo kuwa mushaharka go'an, xitaa guryaha ka dhigaysa kuwo aan la heli karin. *Si fudud waa wax aad u badan.*

Waxaan aad u jecel nahay dugsiyadeena. Anigoo ah qof ka qalin jebiyay Dugsiyada Shoreline, wiil uu dhalay macallin dugsiyeed, waalid ardayda Shoreline ah, iyo shaqaale nus wakhti ah oo iskuul dadweyne ah, waxaan fahmaa heerka tayada waxbarashada ee laga bixiyo dugsiyadeena. Dhibaatooyinka aan la kulanno kuma saabsanna macallimiinteena aadka u fiican; dhammaanteen waxaan u dadaalnaa waxa ugu fiican carruurta bulshadeenna.

Maya ugu Codee qorshe waara - koror macquul ah oo 30-35% oo muddo afar sanno ah kaasoo ka hortaga sicir-bararka iyo isla markaana qayb ka ah koror yar oo ku yimaada diiwaan gelinta degmada. Codkaaga *Maya* wuxuu siinayaa wakhti loogu talagalay soo jeedin tan ka wanaagsan sannadka 2026, *(mid aan dhammaanteen taageeri karno!)* Way adag tahay in la yiraahdo *Maya*, laakiin mararka qaar waa waxa saxda ah ee la sameeyo. *Fadlan Maya ku codee Soo jeedinta 1.*

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Inkasta oo lagu soo bandhigay inay tahay canshuur *beddel ah*, Soo Jeedinta 1 waxay tagaysaa meel aad uga sii fog: *\$62 milyan oo kharash kordhay ah* marka loo eego afar sanno ka hor, *iyadoo tirada diiwaan gelinta degmada aysan kordhin.*

Tani si fudud uguma sii jiri karto bulshadeenna. Inkasta oo *heerarka* canshuuraha ay u egyihiin kuwo la mid ah, qiimaha guryaha ayaa sannad walba kordhaaya, taas oo ka dhigaysa culays weyn oo canshuurta hantida ah oo saaran qoysaska shaqeeya. *Waa caadi in lagu codeeyo Maya*, taas oo u oggolaanaysa Guddiga Dugsiga inay soo bandhigaan qorshe cusub oo dhaqaale ahaan waara dhammaadka sannadkan.

Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama

oonleenka barta kingcounty.gov/elections.

Soo Jeedinta Lr. 2

Beddelaadda Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Hantida Waaweyn ee Horumarinnada Teknolojiyada iyo Taageerada

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-16, ee khuseeya soo jeedinta maalgelinta horumarinnada teknolojiyada iyo taageerada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay iibsato oo rakibto teknolojiyada waxbaridda si loo horumariyo barashada ardayda, loo casriyeeyo qalabka teknolojiyada ee Degmada oo dhan, nidaamyada iyo kaabayaasha, inay bixiso tababar iyo taageero la xiriira, iyo soo rogista canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, oo beddelaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|-------------------|---|---------------------|
| 2027 | \$0.30 | \$7,000,000 |
| 2028 | \$0.29 | \$7,000,000 |
| 2029 | \$0.27 | \$7,000,000 |
| 2030 | \$0.26 | \$7,000,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-16. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))

Bayaanka lagu taageerayo

Sarah Press, Malorie Larson

https://voteyesshoreline.wixsite.com/vote-yes-for-shore-1

Waxbarashada casriga ah waxay u baahan tahay teknolojiyad casri ah, hase yeeshee kombuyuutarrada iyo nidaamyada dhacsan ee Degmada Dugsiga Shoreline ee duugoobay ayaa halis gelinaaya waxbarashada ardayda. Canshuurtaan beddelaadda ah waxay daboolaysaa baahiyaha teknoljiyada muhiimka ah ee muddo dheer dib loo dhigay waxayna u diyaarinaysaa mustaqbalka dhow. Haddii aan ansixinta codbixiyaha la helin, ardaydu waxay heli lahaayeen qalab dhigitaal ah oo aan ku filnayn oo muhiim u ah guusha dunida maanta. Canshuurtaan oo la isku daray canshuurta Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada (EP&O) ayaa la saadaalinayaa inuu keenni doono heerka canshuurta oo celcelis ahaan ka sii hooseeya ee mulkiileyaasha guryaha Shoreline iyo Lake Forest Park sannadka 2027-2030 marka loo eego afartii sanno ee hore.

Canshuurtaan waa maalgelin beddel ah, ma aha canshuuro cusub. Waxay Maalgelinaysa dayactirka iyo beddelka kombuyuutarrada iyo qalabka ardayda iyo shaqaalaha, casriyaynta nidaamyada shabakadaha oo ay ku jiraan amniga internetka iyo hagaajinta kaabayaasha si loo ilaaliyo xogta ardayda, manhajka dhijitaalka ah iyo qalabka barashada oonleenka ah, teknolojiyada fasallada sida shaashadaha iyo nidaamyada codka, qalab waxbarasho oo khaas ah oo loogu talagalay waxbarashada gaarka ah, nidaamyada isgaarsiinta ardayda iyo qoysaska, tababarka shaqaalaha iyo taageerada farsamada, iyo casriyaynta hawlaha degmada.

Dugsiyada guud ahaan degmada waxay u adeegaan arday kala duwan oo leh baahiyo iyo asal ah oo kala duwan. Teknolojiyada waxay bixisaa helitaanka muhiimka ah ee kheyraadka waxbarashada, qalabka isgaarsiinta, iyo fursadaha waxbarasho ee dhammaan ardayda, iyadoon loo eegin xaaladaha qoyska ama in Af-Ingiriiska uu yahay luqaddooda koowaad. Softiweerka la cusbooneysiiyay ayaa meesha ka saara caqabadaha ku saabsan diiwaan gelinta wuxuuna ka caawiyaa qoysaska inay si siman u helaan adeegyada dugsiyada degmada.

Shoreline & Lake Forest Park waxay si joogto ah u maalgeliyeen waxbarashada tayada leh, iyagoo soo saaray qalin-jabiyeeal ka sarreeya celceliska gobolka marka loo eego u diyaarsanaanta jaamacadda. Guushaan waxay muujinaysaa u heellannaanta bulshadeenna ee ah in ardayda la siiyo kheyraadka ay u baahan yihiin si ay u horumariyaan.

Ku codee Haa si ardayda loo siiyo teknolojiyada casriga ah, looga hortago khataraha amniga internetka, loona hubiyo in dhammaan carruurto heli karaan qalabka waxbarashada dhijitaalka ah ee muhiimka u ah guusha waxbarashada iyo xirfadaha mustaqbalka.

Doorashooyinka Degmada King looma oggola inay wax ka beddelaan bayaannada, mana qaadaan mas'uuliyadda qoraallada ku jira.

Bayaanka Sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 2 waxay Dugsiyada Dadweynaha ee Shoreline u oggolaan doontaa inay beddelaan canshuurta hantida waaweyn ee hadda jirta ee horumarinnada teknolojiyada iyo taageerada taasoo wakhtigeedu dhammaanayso dhammaadka sannadka kalandarka ee 2026. Canshuuraha laga ururiyo canshuurtaan beddelka ah waxaa loo isticmaali doonaa in lagu maalgeliyo teknolojiyada. Tan waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, beddelka kombuyuutarrada iyo aaladaha ardayda iyo shaqaalaha; casriyaynta nidaamyada shabakadda, amniga internetka, iyo kaabayaasha; iyo helitaanka manhajka dhijitaalka ah, qalabka waxbarashada oonleenka, iyo nidaamyada maktabadda iyo qiimeynta. Waxay sidoo kale maalgelin doontaa teknolojiyada fasalka sida bandhigyada, nidaamyada codka, iyo kamaradaha dukumeentiga; qalab gaar ah oo loogu talagalay waxbaridda iyo waxbarashada gaarka ah; iyo nidaamyada ardayda iyo qoyska u wajaha isgaarsiinta iyo helitaanka waxbarashada. Intaa waxaa dheer, lacagta canshuurta waxay taageeri doonaan tababarka shaqaalaha iyo taageerada farsamada, iyo sidoo kale casriyaynta hawlgallada degmada iyo nidaamyada maaraynta. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa webseedka Degmada barta www.ssd412.org/Levies26.

Canshuurta hantida waaweyn ee beddelka ah ee horumarinnada teknolnijiyada ee afarta sanno ee la soo jeediyay waxay oggolaanaysaa ururinta canshuuraha si ay u bixiso \$7,000,000 sannad walba laga bilaabo 2027 ilaa iyo 2030. Heerka canshuurta ee halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay inuu soo saaro caddadyadaan canshuurta ayaa lagu qiyaasay inay tahay \$0.30 sannadka 2027, \$0.29 sannadka 2028, \$0.27 sannadka 2029, iyo \$0.26 sannadka 2030. Ka dhaafitaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Wixii macluumaad oo dheeraad ah, la xiriir Waaxda Qiimeynta Degmada King, 206-296-3920.

Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.